



## Maamulka iyo Waxbarashada

### Degmada Säffle

#### Asalamacalaykum! ku dhamaan Waalidiinta

Dhamaan waalidiinta caruurtoodu dhigtaan Iskuulada hoose dhexe ee säffle , waxa la idin ogeysiinaya inay jiraan barnamijyo kala duwan oo inaad la ogaataan ay muhiim tahay. Barnamijyada waxa loo adeegsadaa ujeedooyin ama baahiyoo kala duwan , dhamaantood waa inaad la socoto nidaamka iskuulka ee ilmahaaga . si aad u ogaato barnamijkasta waxa loo isticmaalayo baahidaadu waxay ay tahay sida loo adeegsanayo iyo meeqa jeer ama immisa jeer ayaa aad ubaahantahay inaad furto barnamijka aad ubaahantahay hoos waxa inoogu qoran liiska barnamijyadan inta ugu muhiimsan.

Dhamaantood waxa la adeegsanayaa computerka oo lagana helikaraa

##### 1. IST LÄRANDE: ( Barnamij u gaar ah waxbarashada )

Barnaamijkan waxa loo isticmaalaa si aad wax uga ogaato qiimaynta waxbarasho ee ay sameeyaan macalimiintu ama kulamada waxbarasho ee saanadkii laba jeer waalidka warbixin lagu siiyo sida uu ilmahaagu ku yahay iskuulka iyo waxbarashadiisa , ama ilmahaagu helo caawin dheeraad ah xaga xiisadaha uu barto si aad u isticmaasho barnamijikan waxa ubaahantahay inaad leedahay **Bank ID** iyo sidoo kala betyg ama shahaadooyinka xiisadaha waa ka helikartan, adigoo isticmaalaya bogga internetka ee säffle **saffle.se/betyg**

##### 2. IST VÅRDNADSHAVARE (Barnaamij ugaar ah Waalidka )

Barnaamijkan waxaa loo adeegsadaa si aad wax uga ogaato shahaadooyinka xiisadaha ilmahaaga , sidoo kale telefoon nambarkaga ama emilkaga hadii iskuuku ubaahdo in lagula soo xidhiidho . Barnamijikan si aad u isticmaasho waa inaad leedahay **Bank ID** adigoo isticmaalaya bogga internetka ee säffle **saffle.se/betyg**

##### 3. SKOLA24( Tusaale ahan : waxa loo adeegsadaa hadii ilmahaagu iskuulka imanayn

Barnaanijkan waxa loo adeegsadaa si aad u ogaato jadwalka xiisadaha ilmahaaga, sido kale waxa lagahelikara telefon nambar la waco hadii uu ilmahaagu xanuunsado ama aad doonayso inaad fasax uqaado. Si aad us iticmaasho barnamijikan waa inaad leedahay **Bank ID** waxa aad ka helikartaa wixii warbixin ah ama adeeg aad markaa u baahantahay ama bogga internetka ee iskuulka **saffle.se/grundskola**.

- 4. TYRA ( Waxa la isticmaala hadii ilmahaagu fritids leeyahay iyo waxyaalo kale )**  
Barnaamijkan waxa loo adeegsadaa hadii ilmahaagu fritids leeyahay ama iskuulka kadib sii joogayo , sido kale barnaamijkan waxa aad ku qoraysaa meeqo saacadood ama imisa saacadood uu ilmahaagu joogayo fritids-ka sidoo kale waxa aad kala soconaysaa waxbixinada ka imaanayaan qaybta fritidska ee iskuulka , hadii ilmahaagu xanuunayo waa aad soo ogeysiinaysaa adigoo adeegsanaya barnaamijkan waxa aad ku isticmaalaysa magac ku gaar ah iyo nambarka sirta kadib markii laguu soo email ahaan sido kale wixii inta dheer ee warbixin ku saabsan **Tyra** waxa aad ka helaysaa bogga internetka **saffle.se/fritidshem**
- 5. E-TJÄNSTER**  
Barnaamijkan waxa loo adeegsadaa hadii aad rabto inaad codsi ama dalab tusaale ahaan xilliga iskuulka la billabayo marka fasaxa laga soo noqdo , ama waraaqda codisga ah ee ilamahaaga cuntooyinka aanuu cunin ama codsiga barashada luuqada afka soomaaliga si aad u isticmaasho waa inaad leedahay **Bank ID** kuuna sahlaya inaad adeegsato barnaamijkan waxa ka helikartaa bogga internetka ee säffle [https://e-tjanster.saffle.se./](https://e-tjanster.saffle.se/)